



## Laambadaha Laydhka Folorasant

Waxa ku jira merkuri kuwan.

Waxa aad waydiisaa tukaanka alaabaadka ama meelaha waxa lasoo isticmaalay lagu iibiyo hadii ay uruuriyaan laambadaha folorasantiga ama waxa aad ka eegtaa meel uruurisa [VTrecycles.com](http://VTrecycles.com)

**Meelaha uruuriyaa waxay aqbalaan laambado laydhka foloroosantiga ah oo bilaa xadi ah (CFLs).**

**Maalin kasta, waxay aqbalaan ilaa 10:**

- Folorasantiga Tuunbooyinka ah
- Goobaabta ah
- Laydhka Badan Soo Saara (High Intensity Discharge, HID)
- Uumiga Merkuriga
- Tuunbada U



## Heerkul-haye

Heerkul-hayayaal badan oo qadiimi ah waxaa ku jira merkuri.

**Waxaad ku heshaa \$5 heerkul-haye kasta oo merkuri ah oo aad keento!**

Waxa aad waydiisaa tukaanka alaabaadka ama meelaha waxa lasoo isticmaalay lagu iibiyo hadii ay uruuriyaan heerkul-hayaha folorasantiga ama waxa aad ka eegtaa meel uruurisa [VTrecycles.com](http://VTrecycles.com)

**Keen heerkul-hayaha xarumaha meerkuriga oo dhan. Waxa aad ku heli kartaa \$5 oo dayn tukaanka ah ama in lacagta lagu celiyo.**



# URUURIN BILAASH AH

**Laambadaha laydhadhka folorasantiga, heerkul-hayayaasha uu meerkurigu ku jiro, ranjiga, elektorooniga qaar, iyo baytaryada qaar waxaa ka mamnuuc ah in qashin qubka lagu daadiyo.**

Shayadan waa in la keenaa meelaha sida bilaashka ah u uruuriya, oo ay ku jiraan tukaano badan oo wareejin iyo tukaanada alaabaadka lagu iibiyo.

Wixii kaalmo dheeraad ah, la hadal:

**1-855-632-9253**

(Kaliya Ingiriisi)

[VTrecycles.com](http://VTrecycles.com)





## Elektoroonig

Waxa aad waydiisaa cida qashinka aad u gayso hadii ay uruurshaan elektorooniga ama waxa aad ka eegtaa liiska goobaha uruuriya

[VTrecycles.com](http://VTrecycles.com)



- **Telefishinada**
- **Kombuyuutarada & Taabletyada**
- **Shaashadaha**
- **Birintarada Diskitoobyada**
- **Agabka Kombuyuutarka**  
(mawska, kiiboodhka, iskaanarka, sameecadaha kombuyuutarka, iwm.)

 Vermont e-cycles



## Rinji

Waxa aad waydiisaa tukaanka alaabaadka ama meelaha waxa lasoo isticmaalay lagu iibiyo hadii ay uruuriyaan ranjiga ama waxa aad ka eegtaa meel uruurisa [VTrecycles.com](http://VTrecycles.com)

Weelasha ka wayn kala badh galaan iyo ilaa shan galaan ayaa la ogol yahay

Daasada rasmiga ah ee leh calaamada iyo daboolka:

- |                          |           |
|--------------------------|-----------|
| • Waxyaabaha Saliida Leh | • Birta   |
| • Acrylic                | • Shellac |
| • Xaydha                 | • Ranji   |
| • Enamel                 | • Xabag   |

LAMA OGGOLA daasadaha buufinta  
LAMA OGGOLA daasado ranji oo madhan  
LAMA OGGOLA daasadaha ranjiga bilaa calaamadda ah  
LAMA OGGOLA daasado daadinaya ama waxyeelo qaba

 PaintCare  
RECYCLING MADE EASY



## Baytariyada

Waxa aad waydiisaa tukaanka alaabaadka ama meelaha waxa lasoo isticmaalay lagu iibiyo hadii ay uruuriyaan baytaryada ama waxa aad ka eegtaa meel uruurisa

[VTrecycles.com](http://VTrecycles.com)

- **Baytaryada Marka Kaliya La Isticmaalo:**
  - AA, AAA, C, D
  - 9-Volt
  - Baytaryada Saacadaha
  - Sameecada Dhagoolka
- **Waxyaabaha dib loo dabeyo (ilaa 11 rodol.)**
- **Taleefanada Gacanta (nooc kasta, taleefanka dhan)**

 call2recycle®